



Husein: Kitaabka Quraanka iyo macallimiinta Islaamku waxay yidhaahdeen Yeshuucu wuxuu ahaa nebi. Laakiin Yuhuuddu way diideen, Masiixiyiintuna way caabudaan. Haddaba, haddii uu yahay nebi kaliya, maxay Yuhuuddu u neceb yihiin, Masiixiyiintuna u caabudaan?

Aamin: Waa su'aal wanaagsan. Yeshuucu waa ninka loogu muranka badan yahay taariikhda.Qaar baa leh waa macallin wanaagsan, qaarna waxay leeyihiin waa nebi, qaar kale waxay yidhaahdaan waa beenaale, qaarna waxay aaminsan yihiin inuu Ilaah yahay.

Haddaba si aan u helno jawaabta su'aasha ah: "Yuu yahay Yeshuucu?" Waa in aan marka hore isweydiino: Muxuu Yeshuucu isagu ka sheegay naftiisa? Marka labaad: Maxay rasuulladiisa iyo nebiyadii hore ka sheegeen? Marka ugu dambeysa: Maxay cadowgiisu ka yidhaahdeen?

Si arrimahan loo fahmo, waa in aan dib ugu laabanaa qarnigii kowaad. Layskuma hallayn karo hadalka hal nin oo lix boqol oo sano kadib ku dhashay Sacuudi Carabiya, oo ku hadli jiray af ka duwan kii Yeshuuca, oo 1500km u jira Yeruusaalem. Waxa la raadinayaa waa markhaatiyadii rasuulladii indhahooda ku arkay. Nabiyadu waxay sheegaan dhacdooyinkiisu intaanay dhicin ka hor.Nabiyadii ilaaah waxay wax ka sii sheegeen Yashuuca Ilaah.

Waxaa la hayaa qiyaastii 5800 oo qoraal Giriig oo ka hadlaya nolosha Yeshuuca, hadalladiisa, iyo taariikhdiisa, kuwaas oo laga qoray qarnigii koowaad.

Yay ahaayeen rasuullada markhaatiga ka ahaa dhacdooyinkaas,ma lagu kalsoonaan karaa? Yeshuucu wuxuu doortay laba iyo toban rasuul oo markhaati ka ahaa waxyaabihii uu sameeyay, ama yidhi,ama uu baray. Sida Butros yidhi: "Annagu waxaanu nahay markhaatiyadii waxqabadkiisa ." (2 Butros 1:16). Yooxanaa wuxuu yidhi: "Waxaannu aragnay ammaantiisa." (Yooxanaa 1:14), iyo, "Waxaan idiin sheegaynaa nolosha weligeed ah, taas oo aanu indhahayaga

ku aragnay.” (1 Yooxanaa 1:1-2). Inta badan rasuulladu waxay naftooda u hureen markhaatiga Yeshuuca. Shan kamid ah ayaa qorey noloshiisa. Markhaatiyadaas waa lagu kalsoonaan karaa.
Haddaba maxuu Yeshuucu naftiisa ka yidhi?

1. Wuxuu sheegay in uu jiray ka hor abuurista dunida: “Aabbow, i ammaan, ammaantaan kula lahaa  abuurista dunida ka hor.” (Yooxanaa 17:5).
2. Wuxuu sheegay in uu yahay Ilaahii Ibraahim: “Ka hor intaan Ibraahim jirin, ANIGU WAXAAN AHAY.” (Yooxanaa 8:58).
3. Wuxuu sheegay in uu bixiyo nolosha weligeed ah. (Yooxanaa 10:28).
4. Wuxuu sheegay in uu xukumi doono dadka oo dhan. (Yooxanaa 5:22).
5. Wuxuu sheegay in uu cafin karo dembigayada. (Matayos 9:6).
6. Wuxuu yidhi: “Anigu waxaan ahay jidka, runta iyo nolosha.” (Yooxanaa 14:6).
7. Wuxuu sheegay in uu Ilaah la siman yahay: “Aniga iyo Aabbuhu mid baanu nahay.” (Yooxanaa 10:30).
8. Wuxuu sheegay in uu yahay Ilaahii Daa’uud. (Matayos 22:45).
9. Wuxuu yidhi: “Kii i arkay wuxuu arkay Aabbaha.” (Yooxanaa 14:9).
10. Wuxuu yidhi: “Haddii aydnaan rumaysan WAXAAN AHAY, dembiyadiinna baad ku dhiman doontaan.” (Yooxanaa 8:24).
11. Wuxuu yidhi: “Anigu waxaan ahay nuurka dunida.” (Yooxanaa 8:12).
12. Wuxuu yidhi: “Anigu waxaan ahay Alpha iyo Omega, kan ugu horreeya iyo kan ugu dambeya.” (Muujintii 22:13).
13. Wuxuu yidhi: “Waxaan hayaa furayaasha dhimashada iyo cadaabta.” (Muujintii 1:18).

Maxay rasuulladiisu ka yidhaahdeen?

1. Tomas wuxuu yidhi: “Rabbigay iyo Ilaahayow.” (Yooxanaa 20:28).
2. Xertiisii way u sujuudeen. (Matayos 28:17).
3. Bowlos wuxuu yidhi: “Isagu waa sawirka Ilaaha aan la arki karin… wax walba isaga ayaa lagu abuuray.” (Kolosay 1:15).
4. Yooxanaa wuxuu yidhi: “Eraygu wuxuu ahaa Ilaah… erayguna wuxuu noqday bini’aadam.” (Yooxanaa 1:1,14).
5. Butros wuxuu ugu yeedhay: “Rabbi iyo Masiix.” (Falimaha Rasuullada 2:36).
6. Yacquub wuxuu ugu yeedhay: “Rabbiga Yeshuucul Masiix.” (Yacquub 1:1).
7. Bowlos wuxuu ugu yeedhay: “Ilaaheenna weyn iyo Badbaadiyaha Yeshuuca Masiix.” (Titus 2:13).

Nebiyadii hore maxay ka yidhaahdeen Yashuuca?

1. Miikaah wuxuu sheegay in hoggaamiye ka imaan doono Beytlehem (Miikaah 5:2), taasoo rumowday (Matayos 2:6).
2. Ishacyaah wuxuu yidhi: “Wiil baa inoo dhashay… magaciisana waxaa lagu magacaabi doonaa Ilaah xooga leh.” (Ishacyaah 9:6).
3. Daanyeel wuxuu arkay “Wiilkii Aadanaha” oo ka yimid cirka oo dhammaan quruumuhu caabudayaan. (Daniel 7:14). Yeshuucu wuxuu yidhi: “Boqortooyadaydu ma aha tan dunida… Wiilka Aadanaha ayaad arki doontaan isagoo daruuraha cirka ku imanaya.” (Matayos 26:64).

Cadowgiisu maxay ka yiraahdeen? Yuhuuddu way necbaayeen Yeshuuca oo waxay yiraahdeen: “Waxaanu kuu dhagaxeynaynaa adigoo nin ah,ayaad Ilaah isku sheegaysaa.” (Yooxanaa 10:33). Mar kale waxay yiraahdeen: “Waa kufriga ugu weyn…Waa in lagu dilo.” (Matayos 26:65). “Wiilka Ilaah” micnihiisu waa inuu yahay Ilaah. Waxayna u aqoon sadeen beenaale.

Haddaba saaxiib Huseinaw, laba kooxood ayaa jira: Kuwa aqbalay Yeshuuca iyo kuwa diiday. Isagu waa beenaale ama Ilaah ma jirto fikradda dhexe ee leh wuxuu ahaa nebi keliya. Fikraddaas waxaa la sameeyay qarnigii 7aad. Haddaba, u sujuud oo caabud Yeshuuca, ama beenle ku sheeg sida yuhuudda oo ku eedee kufri – laakiin ogow: Isaga ayaa go'aamin doona halkaad aadaysid aakhiro.janno ama cadaab Yeshuucu wuxuu yidhi: "Waxaan hayaa furayaasha dhimashada iyo cadaabta." (Muujintii 1:18). Ilaah ha kuu furo indhaha si aad u hesho hadiyadda nolosha weligeed ah ee Yeshuuca.